



**Warbixinta Waxqabadka
Hay'adda Waddooyinka Puntland**

Rubaca 4aad (Oct-Dec) 2025

*10th Jan 2026
Office of the CEO
Puntland Highway Authority*

Contents

1. Hordhac	3
2. Waxqabadka maamulka iyo maaliyadda	4
2.1 shirka toddobaadlaha ah ee Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland	4
3. Waxqabadka awoodsiinta hay'adda ee dhinaca farsamada dhismaha sahanka iyo shaybaarka	5
3.1 tabobarka tijaabooyinka shubka iyo ciidda ee ardayda Alpha University Lascaanood.	5
3.2 tabobarka sahanka dhulka (Drone Survey)	5
4. Waxqabadka dayactirka waddooyinka waaweyn iyo yareynta shilalka	6
4.1 Dib u dhiska 4 biyo mareen (culverts) ee deegaanka Kalabayr – Xaarxaar	6
4.2 Dayactirka godadka laamiga weyn	6
4.3 Maareynta dhirta ka baxday laamiga Qardho ilaa Yaka-Yaka	6
4.4 Maareynta dhirta ka baxday waddada ee Bacaadweyn.....	7
vv	7
5. Waxqabadka maamulka, kormeerka iyo dabogalka mashaariicda horumarinta waddooyinka.....	8
5.1 Kormeerka Injinneerada PHA ee dhismaha waddada Galkacyo – Bacaadweyn	8
5.2 Kormeerka dhismaha wajiga kowaad ee laamiga ee Bacaadweyn.....	8
5.3 Kormeerka Guddoomiyaha ee dhismaha waddada Gaalkacyo illaa Bacaadweyn	9
5.3.1 kormeerka dhismaha waddada Gaalkacyo - Bacaadweyn.....	9
5.3.2 kormeerka waddada Gaalkacyo – Dismada	9
5.3.3 kormeerka dhismaha waddada Bcaadweyn – Dismada	9
6. Waxqabadka xoojinta xiriirada kala duwan ee Hay'adda PHA	10
6.1 Xiriirka Hay'adda PHA ee Hay'adaha Dowladda.....	10
6.1.1 kormeerka laamaha Dowadda Puntland ee dhismaha waddada Gaalkacyo-Bacaadweyn.	10
6.1.2 Kulanka Hay'adda iyo Wasaaradda Howlaha Guud ee UNOPS.....	10
6.2 Xiriirka Hay'adda PHA iyo Hay'adaha Caalamiga ah.....	10
6.2.1 Kulanka Hay'adda PHA iyo UNOPS	11
6.2.2 Kulanka wadatashiga Hay'adaha DPL iyo WFP	11
6.3 Xiriirka Hay'adda PHA iyo Dadweynaha	11

1. Hordhac

Warbixinta waxqabadka hay'adda ee saddexda bilood ee u dambaysa sannadka 2025 ka waa warbixin soo koobaysa waxqabadkii iyo guulihii ay hay'addu ka gaartay shaqooyinkii qorsheysnaa saddexda bilood ee lasoo dhaafay ee kala ah (October, November Iyo Desember), iyo sidoo kale shaqooyinkii aan ku jirin qorshaha balse lagu guuleystay in la qabto.

Warbixintan ayaa ku salaysan qorsheyaasha waxqabad ee hay'adda sannadka 2025 sidoo kalena ku jaango'an ujeedooyinka Hay'adda ee horumarinta awoodda maamulka, dayactirka jidadka iyo yareynta shilalka, kormeerka mashaariicda dhismaha waddooyinka iyo sidoo kale xoojinta xiriirka ay hay'addu la leedahay Dowladda, hay'ada caalamiga iyo dadweynaha,

Ujeedooyinka Hay'adda ee sannadka 2025

1. Horumarinta Awoodda Maamulka iyo Maaliyadda Hay'adda
2. Horumarinta Awoodda Hay'adda ee Farsamada dhismaha iyo sahanka waddooyinka.
3. Dib u dhiska, dayactirka iyo horumarinta jidadka laamiga weyn.
4. Maamulka, kormeerka iyo dabagalka Mashaariicda dayactirka ee horumarinta Jidadka.
5. Xoojinta Xiriirka Hay'adda PHA ay la lahayd Hay'adda Caalamiga iyo deeq bixiyaasha , Dowladda iyo dadweynaha, lana dhiso sumcadda Hay'adda.

2. Waxqabadka maamulka iyo maaliyadda

2.1 shirka toddobaadlaha ah ee Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland

6dii October, Gudoomiyaha Hay'adda Waddooyinka Puntland Dr. Abdifitah Mohamed Sugule, Ayaa guddoomiyay Shirka Toddobaadlaha ah Ee Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland. PHA.

Shirka waxaa ka soo qaybgalay Gudoomiye kuxineenka Hay'adda Abdirizak Mohamed Hayir, Agaasimayaasha Waaxyaha, Madax qeybeedyadda iyo Injinneeradda, Waxaana looga hadlayey Wixii qabsomay Asbuucyadii la soo dhaafay, iyo qorshaha Asbuucyada soo socda.



3. Waxqabadka awoodsiinta hay'adda ee dhinaca farsamada dhismaha sahanka iyo shaybaarka

3.1 tabobarka tijaabooyinka shubka iyo ciida ee ardayda

Alpha University Lascaanood.

23kii December, Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland (PHA) ayaa tabobar kooban u qabatay koox kamid ah ardayda Kulliyadda Injineerinka ee Jaamacadda Alpha, faraceeda Laascaanood, tabobarkaas oo ay fuliyeen Injinneerada waaxda shaybaarka ee Hay'adda.

Tababarkan ayaa diiradda lagu saaray tijaaboyinka shubka iyo ciida oo ay ka mid yahin Slump Test, Compression Strength Test, Iyo Sieve Analysis, waxaa sidoo kale ardayda sharraxaad laga siiyey dhammaan qalabka yaalla Laboratory-ga Hay'adda si ay u helaan aqoon iyo waayo-aragnimo la taaban karo,



3.2 tabobarka sahanka dhulka (Drone Survey)

2dii October, Hay'adda Waddooyinka Puntland ayaa tabobar ku saabsan sahanka Dhulka u qabatay ardayda Injinneerinka Jaamacadda PSU Garoowe. Tabobarka oo socday 7 casho ayaa waxaa bixinayay Eng. Abdimahad Mohamed, Agaasimaha Waaxda Injineerinka, Farsamada iyo Nashqadaynta Jidadka ee Hay'adda Waddooyinka Puntland.

Ujeeddada tabobarka ayaa ahayd tayeynta iyo kor u qaadista xirfadda dhallinyarada barata kulliyadaha Injinneerinka ee Puntland.



4. Waxqabadka dayactirka waddooyinka waaweyn iyo yareynta shilalka

Hay'adda PHA oo fulinaysa qorsheyaasha horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha ee Puntland, kana duulaysa ujeedooyinka hay'adda ee sanndka 2025 raacaysanna sahannadi hay'addu samaysay sannadihii la soo dhaafay waxa ay dayactir joogto ah ku samaysay waddooyinka waaweyn ee Puntland si loo xaqiijiyo helista waddooyin hagaagsan loogana hortago khatarta shilalka ay sababaan dhirta iyo godadka ku yaal waddooyinka.

4.1 Dib u dhiska 4 biyo mareen (culverts) ee deegaanka

Kalabayr - Xaarxaar

18kii Desember, Hay'adda Waddooyinka Puntland PHA, waxa ay dayactir ku samaysay 4 ka mid ah Culverts-ka Burbur soo gadhay inta u dhaxaysa deegaanka Kala-bayr iyo Xaar-xaar. Dayactirka ayaa iskugu jiray in la bedelo Shubka Culvert-gu ku fadhiyo iyo Hagaajinta Carro tuurka difaaca u ah. Guddoomiye kuxigeenka Hay'adda PHA Abdirisak Mohamed Xayir iyo injinneero ka socda waaxda dayactirka Hay'adda ayaa goobjoog u ahaa shaqada dayactirka Culverts-ka. Dhinaca kale shaqadan waxaa barbar socday buuxinta iyo simitaanka godadka waaweyn ee ka samaysmay waddada isku xirta Xaar-xaar ilaa Kalabayr.



4.2 Dayactirka godadka laamiga weyn

20kii Desember, Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland (PHA) waxa ay si joogto ah uga shaqaysaa dayactirka godadka ka sameysmay laamiga weyn, waxaana Hay'addu shaqo dayactir ka qabatay masaafu dhan 7KM oo ku taal inta u dhaxeeya Qardho Iyo Carmo. Waxaana shaqadani ka mid tahay dayactirka joogtada ah ee Hay'addu fuliso si loo ilaaliyo jiritaanka iyo tayada waddada.



4.3 Maareynta dhirta ka baxday laamiga Qardho ilaa Yaka-Yaka

5tii October, Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland (PHA), waxaa ay bilawday maareynta iyo gaabinta Dhirta ka baxday wadadda dhineecada gaar ahaan qaybta dhirta soo gashay waddada inta u dhaxaysa Qardho-Yakayaka.

Ugu dambayn Hay'adda waddooyinka Puntland PHA waxa ay ku guuleystay dhammaystirka shaqo socotay muddo badan oo lagu jarayay dhirta ka baxda hareeraha laamiga u dhaxeeya Qardho iyo Dhaxan masaafu dhan 32Km.



4.4 Maareynta dhirta ka baxday waddada ee Bacaadweyn

10kii Desember, Hay'adda waddooyinka Puntland ayaa habayn ku samaysay geedaha ka baxay hareeraha waddada weyn gaar ahaan Deegaanka Bacaadweyn Ee Gobolka Mudug. Hay'addu waxa ay ka howlgashay gudaha magaalada Bacaadweyn iyo sidoo kale meelaha dhirtii ku baxday Meesha laga soo galo magaalada



5. Waxqabadka maamulka, kormeerka iyo dabogalka mashaariicda horumarinta waddooyinka

Hay'adda Waddooyinka Puntland ayaa dedaal badan gelisay maamulka, kormeerka iyo dabogalka mashaariicda dayactirka ee horumarinta jidadka, kuwaas oo ay fulinayaan qandaraaslayda maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah, taas oo ah shaqo hortebin u leh Hay'adda lafdhabarna u ah xaqiijinta ujeedooyinka iyo himilada Hay'adda Waddooyinka Puntland.

5.1 Kormeerka Injinneerada PHA ee dhismaha waddada Galkacyo – Bacaadweyn

Hay'adda Waddooyinka Puntland PHA ayaa kormeertay mashruuca dhismaha waddada Gaalkacyo iyo Bacaadweyn.

Injinneerada Hay'adda oo kormeer ku waday shaqada, waxa ay diiradda ku saareen hubinta joogga lakabka asaaska (Stake out of subgrade layer), iyo habsami u socodka howlaha si loo xaqiijiyo in shaqadu u socoto sidii loogu talagalay.



24kii October, Hay'adda waddooyinka Puntland ayaa mar kale u dirtay injinneerada Hay'adda in ay kormeeraan dhismaha waddada Gaalkacyo – Bacaadweyn. Kormeerkan waxaa diiradda lagu saaray hubinta jooga lakabka labaad (Sub Base Elevation), hubinta ballaca wadada sida ku cad naqshada, iyo dardargelinta habsami u socodka dhismaha si loo xaqiijiyo in shaqadu u socoto sidii loogu talagalay.




29kii Nofeember, Injineerada Hay'adda Waddooyinka DPL ayaa kormeer shaqo ku tagay dhismaha wadada Galkacyo – Bacaadweyn. Kormeerkaas ayaa diiradda saarayey hubinta diyaarinta lakabka kowaad ee waddada (Base layer), buuxinta garbaha waddada, diyaarinta shubka biyo mareennada ku jira waddada, iyo dardargelinta habsami u socodka dhismaha waddada.



5.2 Kormeerka dhismaha wajiga kowaad ee laamiga ee Bacaadweyn

31 dii Diisember, Injineero ka tirsan Hay'adda Waddooyinka Puntland ayaa kormeer ku tagay dhismaha Wadada Bacaadweyn ilaa Dusmada oo wajiga koowaad la saaray Laamiga.

Shirkadda Kebarco Construction CO. oo gacanta ku haysa mashruuca dhismahan, ayaa si habsami leh u wada shaqadaan iyadoo si joogto ah ay u hubinayso Hay'adda Waddooyinka.



5.3 Kormeerka Guddoomiyaha ee dhismaha waddada Gaalkacyo illaa Bacaadweyn

5.3.1 kormeerka dhismaha waddada Gaalkacyo - Bacaadweyn

6dii November, Guddoomiyaha Hay'adda Waddooyinka Puntland, Dr. Cabdifitaax Maxamed Sugulle, oo ay weheliyan injineerada hay'adda ayaa kormeer ku tagay dhismaha waddada Gaalkacyo ilaa Bacaadweyn, halkaas oo uu warbixinno kala duwan ka dhageystay madaxda shirkadaha Al Baashid Iyo Kebaarco oo gacanta ku haya mashruuca dhismaha waddada.



5.3.2 kormeerka waddada Gaalkacyo – Dismada

8dii November, Guddoomiyaha Hay'adda Waddooyinka Puntland (PHA), Dr. Cabdifitaax Sugulle, ayaa mar kale wuxuu kormeer shaqo ku tagay dhismaha waddada Gaalkacyo–Dismada. Kormeerka ayaa diiradda lagu saaray habka tayada ciidda lagu dhisayo waddada iyo guud ahaan heerka uu mashruucu marayo.



5.3.3 kormeerka dhismaha waddada Bacaadweyn – Dismada

9kii November, Guddoomiyaha Hay'adda Waddooyinka Puntland (PHA), Dr. Cabdifitaax Sugulle, oo sii wada kormeerka mashruuca ayaa kormeer ku tagay dhismaha waddada Bacaadweyn–Dismada. Waxaana ku soo dhoweeyay maamulka shirkadaha gacanta ku haya dhismaha waddada.



6. Waxqabadka xoojinta xiriirada kala duwan ee Hay'adda PHA

Xoojinta xiriirka Hay'adda Waddooyinka Puntland ee ay la leedahay hay'adaha caalamiga ah iyi deeq bixiyaasha, Dowladda iyo dadweynaha wuxuu ka mid yahay ujeeddooyinka asaaska u ah gaarista himilooyinka Hay'adda ee horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha ee Puntland.

6.1 Xiriirka Hay'adda PHA ee Hay'adaha Dowladda

Hay'adda waddooyinka DPL, waxay xoojisay xiriirka kala dhaxeeya hay'addaha kala duwan ee dawladda Puntland oo ay ka dhaxeeyo wada shaqaynta ku aaddan horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha ee Puntland, iyadoo si fiican warbixinadda iyo xogaha u kala qaata

6.1.1 kormeerka laamaha Dowadda Puntland ee dhismaha waddada Gaalkacyo-Bacaadweyn.

11 kii Desember, iyada oo laga duulayo xoojinta xiriirka Hay'adda Waddooyinka Puntland iyo laamaha Dowladda ayaa waxaa kormeer ku tegay Wasiirka Maaliyadda DPL, Guddoomiyaha Gobolka Mudug, Duqa Gaalkacyo, Guddiga Horumarinta, isuduweyaasha Gobolka, saraakiil ciidan iyo ganacsato dhismaha waddada Gaalkacyo Illaa Bacaadweyn. Waxaana warbixin ka saabsan habsami u socodka shaqada dhismaha waddada Gaalkacyo Iyo Bacaadweyn iyo hubinta tayada ciidda ay adeegsanayaan Shirkadaha Albaashid Iyo Kebarco siiyay injinierada Hay'adda Waddooyinka Puntland oo qaadanyasa kaalinteeda kormeerka mashruuca dhismaha waddada Gaalkacyo Iyo Bacaadweyn.



6.1.2 Kulanka Hay'adda iyo Wasaaradda Howlaha Guud ee UNOPS.

1dii Desember, Wasiirka Wasaaradda Howlaha Guud Mudane Faarah Cawad iyo Guddoomiyaha Hay'adda Waddooyinka Puntland Dr Abdifitah Sugule ayaa, si wadajir ah xafiiska wasiirka ku qaabilay wafdi ka socday Hay'adda Qaramada Midoobay UNOPS-uu hoggaaminyo Madaxa Xafiiska Soomaaliya iyo Madaxa Barnaamijiyada. Waxaana laga wada hadlay shaqooyinka kaabayaasha dhaqaalaha ay UNOPS ka waddo Puntland, gaar ahaan sahanka jidadka ay dhawaan bilaabayso Hay'addu.



6.2 Xiriirka Hay'adda PHA iyo Hay'adaha Caalamiga ah

Hay'adda waxaa muhiim u ah xoojinta Hay'adaha caalamiga iyo deeqbixiyaasha Caalamka ee ay wada shaqayntu kala dhaxayso, si ujeeddadaas loo hirgeliyana waxaa ay Hay'addu kulamo lagu xoojinayo xiriirka Hay'adaha Caalaniga ah kula yeelatay xafiiska Hay'adda, sidoo kalena waxa ay qayb ka ahayd kulammo Hay'adaha caalamiga ah si guud ula qaateen hay'adaha kala duwan ee Dowladda Puntland.

6.2.1 Kulanka Hay'adda PHA iyo UNOPS

1dii Desember, Gudoomiyaha Hay'adda Waddooyinka Puntland (PHA) Dr.Abdifitah Sugule oo ay weheliyaan Guddoomiye Ku-xigeenka PHA, Mudane Abdirasak Hayir, iyo injinneero ka tirsan Hay'adda ayaa xafiiska Hay'adda ku qaabilay wafdi ka socday Hay'adda Qaramada Midoobay ee UNOPS, oo uu hoggaaminayay Madaxa Xafiiska Soomaaliya iyo Madaxa Barnaamijyada.

Kulanka ayaan looga hadlay mashaariicda kaabayaasha dhaqaalaha ee UNOPS ka fuliso Puntland, gaar ahaan sahanka jidadka muhiimka ah ee ay dhawaan bilaabi doonaan.



6.2.2 Kulanka wadatashiga Hay'adaha DPL iyo WFP

Guddoomiye ku-xigeenka Hay'adda waddooyinka Puntland Abdrisak Mohamed Hayir oo ay weheliyaan khuburo katirsan hay'adda PHA ayaa 9kii Desember 2025 ka qeybgalay kulan wadatashi ah oo u dhaxeeyay Hay'adaha Dowladda iyo Hay'adda WFP.

Shirka waxaa looga arrinsanayay qorshaha WFP Somalia (2026-2030) iyo is waafajinta qorshaha guud ee Puntland (Puntland Five Year plan 4).

Khubburrada Hay'adda PHA ayaa shirka la wadaagay qorshaha waddooyinka Puntland oo ku salaysan qorsha Guud ee Puntland (PUNTLAND FIVE YEAR PLAN)



6.3 Xiriirka Hay'adda PHA iyo Dadweynaha

6.3.1 Hay'adda Waddooyinka Puntland PHA waxa ay mudnaan siisay xiriirka la leedahay dadweynaha Puntland, waxaana ay Hay'addu si joogto ah warbixinnada shaqooyinka ay dadka u hayso aula wadaagtaa bulshada iyada oo u marinaysa website ka Hay'adda ee <https://pha.pl.so> iyo boggaga kale ee hay'addu ku leedahay warbaahinta casriga ah sida Facebook Iyo Twitter.

6.3.2 Hay'addu Waxa ay sidoo kale ka qayb noqotaa madallada looga hadlayo horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha gaar ahaan waddooyinka si ay u gaarto aragtida bulshada taas oo fududeysay helidda baahiyaha degdegga ah ee bulshadu u qabaan isla markaas Hay'addu ku howlgasho ka jawaabistooda

